

WAA MAXAY ILBAXNIMO?

Ilbaxnimo, xadaarad ama waxa afka qalaad lagu yidhaahdo (Civilization) waa eray xambaarsan qeexitaan kala duwan waxay ku xidhantahay qofka qeexaya iyo aragtidiisa, "**ilbaxnimo waa jiritaanka umadeed**" sidaa waxa yidhi Dr. Mayluud oo ah qoraa caana oo udhashay wadanka Liibiya, "**ilbaxnimo waa dal iyo dad u hagar baxay wax soosaar**" sidaana waxa yidhi Maalik binu Nabi oo kasoojeeda wadanka Aljeeriya, hadaba markaad isu minguurisno eray bixinaha ay leedahay ilbaxnimo waxa kasoo baxaya inay tahay eray laga dhadhansanayo horumar iyo koboc, hanoqoto xaga maanka, maskaxda, wax soo saarka, iyo horumarka aqooneed islamarkaana waa eray afka kumacaan dad badanina ay jecelyihiin inay Kunaaloodaan. marka laga hadlayo ilbaxnimada waxa looga hadlaa siyaabo badan iyo dhinacyo kala duwan, waxaan hadaba isku dayayaa inaan ka dhawaaajiyo dhinac qudhaata kaasoo ah maxaa inagala gudboon, bina aadamka dhaqankiisa waxa kamida inuu wax kaqaato waxna utabiyo bulshada ku xeeran ilbaxnimaduna waa wax yaabaha lakala qaato, hadaba maadaama ilbaxnimada maanta ay tahay midaan hufnayn dadku waxay u qaysameen sidan;

1. (**Miro barde duuduubaa lagu liqaa**) ee aan tunka uridano waxkasta oo lagu magacaabi karo ilbaxnimo, fikradaa cidii qaadatay may mahadinin waxayna ku dhaceen barmuuda iyo bad aan xeeb lahayn, kadibna waxay talo kaga idlaatay sidii C/gahayr inay yiraahdaan (**Nin dameerxun iibsaday marbuu dib uxaraashaa**)

2. (**Kab iyo nijaasadeeda waa layslatuuraa**) sidaa waxa yidhi kubo hankooblaxaala waxkasta oo kayimaada xaka reer Galbeed kana gaashaanka kudhufta isuna haysta inay xaq ku taagan yihiin isla markaana waa kuwa xagooda lay nooga soo dhacay islaamkuna uu eeday.

3. (**Baqal fardo la daaqday inay kamidtahay ismoodaa**) waxa jira dad iyagu waxba aan ka faa'iidsan horumarka caalamka dan toodii iyo dad nimadoodiina seegay markaad laba eray isdhaaf sataana kuugu jawaabaaya horumarbaa lagaadhay, dadna kuwaasaa ugu liita aniga aragtidayda waxa layidhi (**dacawo talaabadeediina katagtay tii nabiga gaadhiwayday**).

4. Kala haadi oo huf waxa lagu magacaabo ilbaxnimada waxa lafdhabar u ah wax yaabo badan oo muslimiintu ay baahi u qabaan hadaba aan ka qaadano wixii waxtar inoo leh sida kubuyuutarada iyo qalabka casriga ah, caafimaadka iyo wixii laxidhiidha, maamulka oo ah meelaha aynu ka liidano, farsamada gacanta iyo wax soo saarka, iyo waxkasta oo wax ku'ool ah meel kadhacna aan ku ahayn diinteena, hadaba fikradan ugu damdaysaa waa tan ugu macquulsan sababahan hoos ku qoran awgood;

1. **Abuhurayra iyo qisadii shaydaanka** waxa banaan in waxlaga qaato qofka gaalka ah hadii waxa uu sheegaa xaq yahay waxa taana kutusaaya qisada dhexmartay Abuhurayra iyo Shaydaanka ee ku saabsan aayatul kursiga iyo inuu abu hurayra ka aqbalay

2. **Hijradii Rasuuka iyo Ibnu Urayqid**, Rasuulka (calayhi salaam) oo ka qaatay ninkii la odhanjiray Ibnu Urayqid arimo kusaabsan juquraafiga taasina waxay dhacday Hijradii Rasuulka (calayki salaam) iyada oo ninkaasina uu ahaa gaal

3. **Isbahaysikii Axzaab**, markay isasoo bahaysteen beelihii carbeed iyaga oo duulimaad ku ah madiina Rasuulku (calayhi salaam) wuxuu latashaday saxaabadii waxaanu waydiiyay wixii layeeli lahaa waxa kacay saxaabiga layidhaa salmaan al-faarisi oo kasoo jeeda wadanka maanta looyaqaano iiraan waxaanu yidhi sidan; "**halagu wareejiyo magaalada madiina dhufays**", kadibna waxa laqoday dhufayskii lamagac baxay **al-khandaq** hadaba dhufaysyada lagama aqoonin wadanka carabta hase ahaatee salmaan wuxuu tilmaamay in laga isticmaalo wadankiisa (al-furus) Rasuulkuna (nabad gelyo iyo naxariis korkiisa ha ahaatee) wuu ka yeelay.

4. **Cumar binu Khaddaab iyo diiwaan gelinta**, diiwaanka wax lagu qoraa waxa uu kandhignaa Networkinka maanta marka la eego wakhtiyadii hore hadaba markaad akhrido taariikhda islaamka waxaad arkaysaa qofkii ugu horeeyay ee u isticmaalay hab qaran inuu ahaa Cumar binu Khaddaab islamarkaana waxa kuu muuqaanaya in erayga diiwaan aan u ahayn carabi ee uu yahay eray ah faarisi (iiraani) dadkaas reer iiraan ayaana adeegsan jiray diiwaanka Cumarna iyaga ayuu kasoo qaatay.

Afeef iyo gunaanad

Waxa iga xasuusin ah inaan adeegsaday eraga ah **ilbaxnimo** maadaama oo uu yahay eraybixin guud inkasta oo aan kuqanacsanahay inuu yahay eray lagu dagayo dadka ah maangaabka, marka xigana waxa xusid mudan inaytaasi tahay aragti shakhsi ah islamarkaana aad umadax banaantahay inaad kadhiibato aragtidaada aniguna aan diyaar u ahay in laysaxo.

Khadar Cumar Jaamac

Submitted by Br. ABDULKADIR HASSAN